

**Amarka L. 80 rep.**

**Xeerarka ku saabsan dambiyada ay dhigayaan xeerka ciqaabta milateri ee ay galaan xubno ka tirsan Ciidanka ilaalada bulshada.**

## **MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

### **MAAMULAHA**

Marka uu arkay xeerka 8 Febraayo 1950, lamba. 12;  
Marka uu arkay dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 31 Maarso 1950;  
Marka uu arkay amarka lamba. 5 ee ku saabsn maqaamka sharciyeed ku-meelgaarka ee Dalka;  
Marka uu Garowsaday baahida ku saabsan hawlaha loo xilsaaray shaqaalaha Taliska madaniga ee Ilaalada, in loo soo saaro xeerar hubinaya wax ku oolnimada hawlahooda;  
Isagoo Qaddarinaya awoodda la siiyay;

### **WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA**

#### **Qod. 1**

Ciidanka Ilaalada waa ciidan madaniya oo u ababulan qaab ciidan milleteria, xubnaha ay ka koobanyihiina ciidankaasu waxaa lagu dhaqayaa garsoorka ciidamada wixii la xariira dambiyada soo socda, ee ku qoran xeerka ciidamada talyaaniga:

- a) gadoodka;
- b) fallaaganimada;
- c) shaqa ka tegista;
- d) amar diidmada;
- e) iibka ama warejinta shayada uu leeyahay maamulka dawladda.

#### **Qod. 2**

Xukunka ay ku riddu Maxkamadda Ciidamada waxaa la socda shaqada oo laga saaro.

#### **Qod. 3**

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa 1 Disember 1950.

Maamulaha

**Gorini**